



## In aad isticmaasho maktabada buugaagta

Waxaad ka heli kartaa maktabada buugaagta, buugaag, joornaalo, aflaam, cajalado iyo cayaaraha tv-ga. Sidoo kale waxaad ka heli kartaa buugaag ku qoran afaf kala duwan, buugaagta laga barto luuqadaha, qaamuus iyo kuwa naxwaha.

Arrimahan kor ku xusan oo dhan waad amaahan kartaa, haddii aad haysato kaarka amaahda. Si aad u hesho kaarka amaahada, waxaa lagaa rabaa in aad tusid, kaarkaaga aqoonsiga, ogolaatidna, shuruucda u taal amaahashada.

Kaarkan amaahda waxaad wax kaga daysan kartaa, 35 maktabadood iyo sadex baskaka buugaagta.

Amaahashada ugu yar, waa labo asbuuc. Wakhtiga amaahashadu wuxuu ku yaal waraaqda (rasiidka) lagu siiyo marka aad wax amaahan.

Kaarka amaahdu waa bilaash, waxaa kale oo bilaash ah in aad buugaag amaahato.

Haddii aadan soo celin weydo buugaagta lacag baad bixin.

Maktabado qaarkood, waxaad ka heli kartaa kombiyuutar iyo internet.

Maktabada waxaad ka heli kartaa, macluumaad, muxaadarrooyin, sheeko akhris, bandhigyo. Shaqaalaha ayaad waydiin kartaa haddii caawimaad aad rabto amase qabto su'aal.

# SNOKAbibliotek

snokabibliotek.se

